



Sii deyn Degdeg ah: HAB CUSUB OO HAL ABUUR LEH OO KU AADAN ADEEGYADA XIRIIRKA CAAFIMAADKA LEH AYAA LAGA BILAABAY LABA DUGSI SARE OO KU YAALA PORTLAND

Portland, Ore. Abriil 17, 2018ka – Hay’ada Dugsiga Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance, Raphael House of Portland, Volunteers of America Home Free, iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku faraxsan yihiin in ay ku dhawaaqaan bilaabida barnaamij wada shaqeyneed oo adeegyada U doodista Xiriirka Caafimaadka Leh siinaya Dugsiyada Sare ee Cleveland iyo Franklin.

Waxaa jira aqoonsi sii kordhaya oo la xiriira baahsanaanta rabshadaha xiriirka dhallinyarada iyo saameynta uu ku leeyahay bulshada, dareenka, iyo wanaaga waxbarashada ee ardayda. Dadaal ilo buuxa lagu siinayo ardayda doonaysa in laga taageero horumarinta xiriirka caafimaad leh, Hay’ada Dugsiga Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance waxay dejisay Mashruuca Hirgelinta Sharciga Xiriirka Dhallinyarada Caafimaadka leh oo wada shaqeyn la leh Raphael House of Portland, Volunteers of America (VOA) Home Free, Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyo Xarumaha Caafimaadka Ardayga oo ka jira Dugsiyada Sare Cleveland iyo Franklin. Barnaamijkan tijaabada ahi waa mid aan hore ugu jirin Maraykanka, isaga oo hadda ah barnaamijka kaliya ee dugsiga dadweynaha ee loo ansixiyey ee adeegyada u doodida oo qarsoodi ah oo isla goobta laga helayo siya dhallinyarada. Ururka E.C. Brown ayaa maal geliya mashruucan.

Hirgelinta Sharciga Xiriirka Dhallinyarada Caafimaadka leh (HTRA) waxaa la ansixiyay Janaayo 2013-kii (Sharciga La Soo Jeediyay ee Oregon 4077), isaga oo waajib kaga dhigaya in dugsiyada degmooyinka Oregon ay qaataan siyaasaddo iyo barnaamijyo wax ka qabanaya rabshada shukaansiga dhallinyarada. Si kastaba ha ahaatee, ma jirin wax lacag ah oo ku lifaaqnaa sharcigan, iyada oo aanu jirin dugsiyada Oregon oo hadda buuxinaya shuruudaha looga baahay yahay HTRA. Mashruuca Hirgelinta Sharciga Xiriirka Dhallinyarada Caafimaadka leh, oo ay fikradiisa lahaayeen isla markaana maamulaan Hay’ada Dugsiga Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance waxay ujeedadeedu tahay in la abuuro qaab tijaabo ah oo loogu talagalay hirgelinta HTRA, oo laga yaabo in mid kaasi shabaha laga hirgeliyo dugsiyada kale mustaqbalka.

Adeegyada u doodista xiriirka caafimaadka leh waxaa bixiya u doodayaal khibrad leh oo ka kala socda Raphael House of Portland iyo VOA Home Free, oo ah laba hay’adood oo aan faa’iido doon ahayn oo xaruntoodu tahay Portland kuwaasi oo manhajka xiriirka caafimaadka leh barayay fasallada Dugsiyada Dadweynaha Portland in ka badan 12 sano. Iyaga oo dhisaya xiriiradooda adag ee jira ee ay la leeyihiin ardayda, macallimiinta, iyo maamulayaasha labada dugsiba, U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh waxay dhallinyarada u caawin doonaan si shakhsi ahaaneed, iyaga oo bixin doona taageerada dugsiga oo dhan oo si loo abuuro dhaqan dhiirgeliya xiriirka badbaado, sinnaan iyo caafimaad leh.

Laga bilaabo Abriil 16, 2018-ka, ardayda dhigata Dugsiyada Sare ee Cleveland iyo Franklin waxay awoodi doonaan in ay U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh laba maalmood toddobaad kasta ka helaan Xarumahooda Caafimaadka Ardayda. Saddexdii dhallinyaro ee koraysaba hal ayaa la kulmi doona nooc ka mid ah xadgudubka, iyada oo U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh ay adeegyada lagama maarmaanka ah iyo ka warqabka dhibaatooyin naxdinta leh siiyaan dhallinyarada u baahan taageero ka dib marka ay dhacaan shukaansi iyo rabshada galmada. Sida ay codsadeen ardaydu, u doodayaashu waxay bixiyaan taageero qarsoodi ah oo fool-ka-fool ah isla markaana joogto ah, qiimeynta iyo qorsheynta badbaadada, iyo u gudbinta bulshada, caafimaadka, iyo ilaha waxbarashada. U doodayaal ka socda Raphael House iyo VOA Home Free ayaa sidoo kale fududeyn doona seminaaro iyo tababaro loogu talagalay ardayda, macallimiinta, iyo waalidiinta; iyaga oo si dhow ula shaqeyn doona maamulayaasha si ay u dejiyaan siyaasaddo iyo nidaamyada dugsiyada si loo taageero dhaqan xiriiro caafimaad leh.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan Mashruuca Hirgelinta Sharciga Xiriirka Dhallinyarada Caafimaadka leh, fadlan la xiriir Ashley McAllister, Maamulaha Barnaamijka ee Hay'ada Dugsiga Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance, ashley@osbha.org ama (503) 719-4515.

Adeegyada U doodista Xiriirka Caafimaadka Leh Ayaa Hadda Laga Helayaa Cleveland iyo Franklin

Waxaa jira aqoonsi sii kordhaya oo la xiriira baahsanaanta rabshadaha xiriirka dhallinyarada iyo saameynta uu ku leeyahay bulshada, dareenka, iyo wanaaga waxbarashada ee ardayda. Dadaal ilo buuxa lagu siinayo ardayda doonaysa in laga taageero horumarinta xiriiro caafimaad leh, Dugsiyada Sare ee Cleveland and Franklin waxay bilaabi doonaan bixinta adeegyada u doodida xiriirada kaasi oo la qabanayo Abriil 16, 2018-ka. U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh waxay adeegyada lagama maarmaanka ah iyo ka warqabka dhibaatooyin naxdinta leh siiyaan ardayda u baahan taageero iyada oo sababtu tahay shukaansi iyo rabshada galmada.

U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh waxay bixiyaan adeegyada soo socda:

Taageero fool-ka-fool ah oo loogu talagalay ardayda	Taageerada bulshada dugsiya
<p>Taageero qarsoodi ah oo joogto ah marka la codsado:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qiimeynta iyo qorsheynta badbaadada • U gudbinta bulshada, caafimaadka, iyo ilaha waxbarashada • Taageero dhanka niyada ah oo fool-ka-fool ah 	<p>Taageerada dugsiya oo dhan oo si loo abuuro dhaqan dhiirigeliya xiriiro badbaado iyo caafimaad leh:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Barnaamijyo waxbarasho iyo seminaaro loogu talagalay ardayda, macallimiinta, iyo waalidiinta • Ilo iyo tababaro loogu talagalay macallimiinta, xarunta iyo shaqaalaha xarunta caafimaadka dugsiya

Adeegyada u doodista xiriirka caafimaadka leh waxaa bixiya Raphael House of Portland iyo VOA Home Free, oo ah laba hay'adood oo aan faa'iido doon ahayn oo xaruntoodu tahay Portland kuwaasi oo manhajka xiriirka caafimaadka leh barayay fasallada Dugsiyada Dadweynaha Portland in ka badan 12 sano. Ilahani waxaa la bixiyaa iyaga oo qayb ah Mashruuca Hirgelinta Sharciga Xiriirka Dhallinyarada Caafimaadka leh, oo ay maamulaan Hay'ada Dugsiya Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance oo wada shaqeyn la leh Raphael House of Portland, VOA Home Free, Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Xarumaha Caafimaadka Ardayga ee Cleveland iyo Franklin.

U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh waa kuwo ay sharciyadu ku waajibiyeen in ay ilaaliyaan qarsoodinimada dhammaan dadka la wadaaga macluumaad, sidaas darteed ma aha soo sheegayaal ay ku waajibto 'mandatory reporters'. Waxay ka caawin doonaan ardayga in uu macluumaad u sheego koox kale haddii iyo marka ardaygu doorto. Haddii uu qofku macluumaad u sheego U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh taasi oo horseeda in ay rumaystaan in qofka wax sheegaya ama qof kale uu khatar ku jiro, u dooduhu wuxuu sameyn doonaa dadaal kasta si uu uga caawiyo soo bandhiguhu warbixin ugu gudbiyo maamuladda ku habboon, taageero siiyo, iyo qorshaha badbaadada hadba sida loogu baahan yahay. U doodayaasha Xiriirka Caafimaadka Leh ayaa sidoo kale la heli karaa si waalidiinta looga caawiyo in ay qorsheeyaan su'aalaha iyo xaaladaha adag. Waxay si dhow ula shaqeeyaan dugsiyada si ay u ilaaliyaan badbaadada arday kasta, iyo raacida dhaqamada wanaagsan.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan barnaamijkan, fadlan la xiriir:

Ashley McAllister, Maamulaha Barnaamijka ee Hay'ada Dugsiga Ku-Salaysan ee Oregon ee Health Alliance – ashley@osbha.org

Elisa Schorr, Agaasimaha Barnaamijyada Dugsiyada Sare ee Dugsiyada Dadweynaha Portland – ewinger@pps.net

